**Hal abuurka Caalamiga ah ee Druid Hills High Juniors ayaa Iftiimiyay Waxyeelada Qoraxda**
**Waxay u Keenaan Qeybiyayaasha Kareemka Qoraxda Boosaska Dadweynaha oo Gobolka DeKalb oo dhan**




Dugsiga dhexe wuxuu bulsho ahaan u noqon karaa waqti qalafsan oo loogu tallogalay dhalinta aan qaangaarin sabab la xiriirto caqabadaha qaangaarnimada iyo isbeddelada kale ee jirkooda. Mid ka mid ah walaacyada ugu badan waa muuqaalka finanka, taasoo inta badan keenta faallooyin xun oo asxaabta. Way ku adkaan kartaa dhalinta aan qaan gaarin inay fahmaan waxa ku dhacaya maqaarkooda iyo sida loola macaamilo.

Inta lagu jiro dugsiga dhexe, Ellis Schroeder wuxuu la kulmay xaalad maqaarka oo aad u daran ee loo yaqaan bararka maqaarka, taasoo weli jirta. Bararka maqaarka waa cudur maqaarka ku dhaca oo saameeya ku dhawaad 16 milyan oo dadka Mareykanka ah, sida ay sheegeen Machadka Maqaarka Mareykanka (AAD). Hadda, ardayga fasalka 11aad ee Dugsiga Sare ee Druid Hills, Ellis wuxuu inta badan la kulmay maqaarka oo gaduuta iyo nabaro sanka ah iyo dhabnaha ka soo baxo sabab la xiriirto xaaladaan bararka maqaarka ee muddada dheer.

“Waxaa jira arrimo badan oo isku kalsoonaanta dugsiga dhexe. Leenka aan ku jiray ayaa waxaa iga saaray mid ka mid ah macalimiinteyda fasalka sayniska, oo macalinkana wuxuu i weydiiyay waxa ka qaldan wejigeygaa,” Ellis ayaa yiri. “Dadka ku jiro fasaladeyda ayaa horaan ii su'aalayay haddii aan soo marsaday midabo ama haddii aan soomarsan lahaa isqurxin oo i weydiiyaan maxaa ku dhacay wajigeyga. Taasi waxay dhaawac weyn u tahay kalsoonideyda.”

Ellis wuxuu bilaabay inuu baaro xaaladiisa iyo xaaladaha kale ee maqaarka sida caadiga saameeya dhalinyarada. Wuxuu aqriyay waraaqo cilmi baaris ah oo ka yimid dhaqaatiirta maqaarka oo uu ka daawaday fiidiyowyada YouTube ee ku saabsan bararka maqaarka iyo xaaladaha kale ee maqaarka ee la midka ah.. Wuxuu isku dayay inuu xaaladiisa u sharaxo ardayda ay isku fasalka ahaayeen balse wuxuu markiiba ogaaday inaysan fahmin muhiimada caafimaadka wanaagsan oo maqaarka ah.

"Ma hayno waxbarasho caafimaad oo aad u xooggan, gaar ahaan la xiriirto maqaarkeena," Ellis ayaa yiri. "Taas ayaa waxay igu dhiirisay inaan bilaabo urur loo yaqaan DermaTeens, kaasoo loogu tallogalay waxbarida dhalinta oo caafimaadka maqaarka iyo sare u qaadida badqabka qoraxda."



DermaTeens waxaa loo aasaasay 2021 sida mashruuc lagu abuuro maqaalo warbixinta oo ku saabsan xaaladaha kala duwan ee maqaarka. Ellis wuxuu cilmi baaris ka sameeyay Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurada iyo AAD si uu u abuuro maqaalo warbixin. Sida waafaqsan Jaalalka Cudurada carruurta ee Agoosto, qaar ka mid ah arrimaha maqaarka caadiga ah ee saameeya dhalinyarada waxaa ka mid ah fin doobka, cambaarta, nabraha, cudurka unugyada maqaarka, iyo bararka maqaarka.

Ellis wuxuu ku kordhiyay DermaTeens illaa 50 dhallinyaro caalamkoo dhan kadib markuu arkay sare u kaca aragtiyada aqriyayaasha. Bogga waxaa loogu tallogalay oo uu ku saabsanyahay warbixin wadaagida ku saabsan caafimaadka maqaarka iyo la dagaalanka sinnaan la'aanta caafimaadka ee saameyso dhalinyarada.

“Taasi waxay nagu dhiirogelisay inaan sameyno barnaamijyo kala duwan, "Ellis ayaa yiri. “Waxaan abuurnay xirmooyinka kareemka qoraxda, xirmada walxaha nadaafada, iyo sheeyada aadka loogu baahanyahay ee Hoyga Guri la’aanta Howlgalka Atlanta.”

DermaTeens ayaa hadda ku lugleh dhowr mashruuc, oo ay ku jiraan ku rakibida qalabka kareemka qoraxda ee meelaha dadweynaha. Gudaha 2022, Ellis wuxuu ku biiray IMPACT Melanoma si ay u maalgeliyaan oo ay ku sameeyaan illaa labo iyo toban qeybiyayaal oo kareemka qoraxda dadweynaha ee Zonolite Park ee agagaarka Druid Hills. IMPACT Melanoma waa urur hormuud ah oo aan faa'ido doon aheyn ee ka shaqeeyo Mareykanka oo u heelan inay si weyn u yareeyaan dhacdooyinka melanoma oo ay badbaadiyaan nolosha.

IMPACT Melanoma waxay ku bixisaa qeybiyayaasha kareemka qoraxda oo gacmaha aheyn sida waafaqsan Barnaamijkeena “Maqaar Badqab ah ee Shaqada”. Hami leh sida marwalba, Ellis wuxuu qabtay lacag ururin si uu lacag ugu aruuriyo qeybiyayaasha oo waxaa u suurtogashay inuu ku rakibo Zonolite Park kuleelaha la soo dhaafay.

"Waxaan la xiriiray [IMPACT Melanoma] oo waxaan u sheegay inaan rabo inaan midaan u keeno bulshadeyda,” ayuu yiri. “Waa mashruuc aad isu hogaamiyo halkaasoo ah inaan ka codsado maalgalin iyo iskaashiyo darjiimada iyo waaxyada madadaalada.”

Ellis wuxuu kula xiriiray mashruuciisa gudoomiyayaasha Gobolka DeKalb i-meel ahaan. Gudomiye Ted Terry ayaa isla markiiba ka soo jawaabay oo ku daray Chuck Ellis, agaasimaha Waaxda Madadaalada iyo Darjiimada Gobolka DeKalb. Waxay hadda iska kaashanayaan inay ku rakibaan qeybiyayaasha aaga Toco Hills, halkaasoo uu Ellis deganyahay, iyagoo kaashanaya Guddiga Dhalinyarada Gobolka DeKalb – urur uu Ellis ka qeyb yahay. Ku rababitaanadaan ayaa qorsheysan inay dhacdo dabayaaqada gu'ga. Marka xigta, waxay sahminayaan suurtagalnimada in lagu sameeyo qeybiyayaal xarumaha goolofka iyo teeniska oo gobolkoo dhan ah iyo illaa waddooyinka.

DermaTeens waxay leedahay ujeedo lagula dagaalamo faafida warbixinta qaldan ee ku saabsan caafimaadka maqaarka. Tusaale ahaan, waxaa jirta fikrad qaldan oo caadi ah ah sida in Ameerikaanka Afrikaanka ah aanay u baahneyn inay marsadaan kareemka qoraxda. Si kastaba, tan ayaanan dhab aheyn. AAD waxay sheegaysaa in dhammaan dadka maqaarka midibka, oo ay ku jiraan kuwa leh maqaarka baroonka iyo madowga, inay u nugul yihiin kansarka maqaarka. Sidaas darteed, dadka midabka lwaxay u baahanyihiin inay marsadaan kareemka  qoraxda si ay u yareeyaan halisra kansarka maqaarka.

“Iyo ogaanshaha kansarka naasaha faafay ee hooyadeey iyo kadib ogaanshaha ogaanshaha kansarka maqaarka eedadeyda ayaa ii iftiimisay arinta weyn ee ay noqon karto caafimaadka maqaarka iyo sida ay lama huraan ugu tahay dadka da' walba ah iyo midabada maqaarka ah

inay isticmaalaan badqabka qoraxda oo ay xooga saaraan hubinta jirkoo dhan waa caafimaad in laga hortago waxyaabaha sida," Ellis ayaa tiri.

Ellis wuxuu sheegay inuu dareemo awood uu ku baro asxaabtiisa iyo dadka kale wax ku saabsan caafimaadka maqaarka, taasoo ku dhiirogelineyso inuu tixgeliyo shaqo dhinaca caafimaadka dadweynaha ah. Wuxuu rajeynayaa in shaqadiisa ay sidoo kale ku dhiirogelineyso dhalinta kale inay sameeyaan isbadel fiican oo bulshadooda gaar ahaan arrimaha ay jecel yihiin.

"Haddii aad si dhab ah indhahaaga ugu furtay waxa ka socdo hareerahaaga, waxaad dhabtii ogaan kartaa arrimo aad ku tiirsan kartid kuwaasoo ku murugeeyo ama ku xanaajiyo oo aad heshid qaabab aad ku hagaajisid, ayuu yiri Ellis. "Waxay noqon kartaa mid aad loogu qanco."

Wixii warbixin dheeraad ah oo ku saabsan DermTeens, fadlan riix linkiyada hoose.

- https://dermateens.wixsite.com/dermateens
- https://www.instagram.com/dermateens/
- https://www.youtube.com/watch?v=nxqgtIJ_B3A
- https://www.linkedin.com/company/dermateens
- https://impactmelanoma.org/meet-ellis-schroeder-your-skin-is-in-ambassador-and-founder-of-dermateens/